Barnaamijka Taakulaynta Ilmaha ee Gobolka Washington



Samaynta Waalidnimo Loogu talogalay Ilmahaaga Dartiisa...

# Waxa ay Khasab tahay in uu Waalid Kasta Oggaado

Waalid kasta waxaa khasab ku ah in uu kaqayb qaato baahooyinka ilmahooda. Ilmo kasta wuxuu mudanyahay in uu oggaado waalidiintiisa ama waalidiinteeda sharciga ah iyo in uu sheegto xuquuqaha iyo dheefaha la imaanaya aqoontan.

Washington State Department of Social & Health Services

*Transforming lives*

## Maxaan u samaynayaa waalidnimo?

Waa muhiim in la sameeyo xiriir sharciyeed oo u dhaxeeya waalidiinta iyo ilmaha. Xadidaada waalidiinta sharciga ah waxay faa'iido u tahay ilmaha. Qaar kamid ah dheefahaan waxay yihiin:

- Dheefaha dowlada ee ah sida dammaanada bulshada iyo dheefaha kutiirsanaanta halyeeyga dagaal ee hore waxaa heli kara ilmaha.
- Ceymiska daryeelka caafimaadka ee loogu talogalay ilmaha ayaa laga heli karaa tooska qorshaha caafimaadka ee waalidka.
- Siyaasadaha ceymiska ee nolosha iyo dheefo dhaxal oo kale.
- Dhakhtarada qoyska ayaa si fiican ugu caawin kara ilmaha marka ay ogyihiin taariikhda buuxda ee caafimaadka qoyska ilmaha.
- Waalidiintu waxay bixiyaan taageero dhaqaale iyo dareen ah.

## Sideen u samayn karaa waalidnimada?

Waxaa jira qaabab baddan oo lagu samayn karo waalidnimada sharciga ah.

- **Lammaananimada guriga diiwaan-gashan ama guurka**
  Haddii uu ilmaha dhasho inta lagu guda jiro lammaananimada guriga diiwaan-gashan ama guurka, ilmaha waxaa la filayaa in uu noqdo ilmo guurkaasi ama lammaananimada guriga ku dhashay. Midaan waxay samaynaysaa "waalidnimada la filanayo". Filashada waxay noqon kartaa mid looga hortago fayl loo sameeyo si munaasab ah midkaas oo ah Qirashada Waalidnimada ama amarka maxkamada.

- **Qirashada Waalidnimada**
  Qirashada Waalidnimada waa foom sharciyeed oo u oggolaanaya waalidnimada in loo sameeyo si iskaada ah ayada oo aan la aadin maxkamada. Qirashada Waalidnimada waxaa sixiixaya waalidka ilmaha dhalay iyo qof doonaya in uu sameeyo waalidnimada. Foomka waxaa sixiixi kara waalidka hido ahaan dhalay, waalidka la filayo, ama waalidka tooska dhalmada la caawiyay. Sharciga gobolka wuxuu tixgelinayaa qofka sixiixaya foomka in uu noqdo waalidka sharciga ah ee ilmaha. Dhammaan waalidka ilmaha dhalay iyo qofka kale ee doonaya in uu sameeyo waalidnimada waxaa khasab ku ah in ay sixiixaan foomka waxaana khasab ah in lagu sharciyeeyo ama sixiixo markhaatida horteeda. Waa in uu loo diro dhinaca Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington, Xarunta Tirakoobka Caafimaadka (DOH/CHS). Isbitaalada waxay bixin karaan adeegaha foomka iyo macluumaadka, sixiixa ama markhaatiga, waxayna adiga kuugu dirayaan foomka dhinaca DOH/CHS. DOH/CHS waxay u magacaabi doontaa waalidka sixiixaya foomka sida aabaha sharciga ah ama waalidka ku qoran shahaadada dhallashada.

- **Amarka Maxkamada**
  Si ka baxsan hawsha Qirashada Waalidnimada ee iskaada ah, maxkamadu waxay xadidaysaa waalidnimada sharciga ah.

# Samaynta Waalidnimada ayada oo la isticmaalayo foomka Qirashada Waalidnimada

## Maxay khasab u tahay in aan sixiixo Qirashada Waalidnimada?

Foomka waa qaab lacag-jaban, oona sharciyeed oo lagu samayn karo waalidnimada. Sixiix foomka kaliya haddii aad hubtid in aad doonaysid in aad noqotid waalidka ilmaha ee sharciga ah.

## Halkeen ku sixiixayaa foomka Qirashada Waalidnimada?

Inbaddan oo waalidiinta kamid ah waxay ku sixiixaan foonka isbitaalka, xarunta caafimaadka ee lagu dhalayo, ama guriga midaas oo ah hoosta daryeelka umulisada.

- Haddii aad u baahantahay caawimaad, isbitaalka, umulisada, ama shaqaalaha xarunta lagu dhalayo ayaa kaaga jawaabi kara su'aalahaaga, kugu caawin kara in aad buuxisid foomka, sixiixdid ama markhaati u heshid foomka, kadibna loo diro foomka dhinaca DOH/CHS. Xafiisyada DCS, bangiyada iyo waaxyada caafimaadka ee deegaanka ayaa sidoo kale sixiixi kara ama markhaati ka noqon kara foomka.
- Haddii aad ku sixiixdid foomka Qirashada Waalidnimada gudaha 5 maalmood oo laga joogo goorta uu ilmahaaga dhasho, adigu uma baahnaan doontid in aad lacag ku bixisid dirida foomka.
- Haddii aadan ku sixiixin foomka isbitaalka, waxaad ka heli kartaa foomka waaxda caafimaadka gobolkaaga ama xafiis kasta oo Qaybta Taakulada Ilmaha ah (DCS). Shaqaalaha DCS waxay markhaati ka noqon karaan oona sixiixi karaan foomka. Haddii aad ku sixiixdid xafiiska DCS, DCS ayaa diri doonta foomka la dirayo oona bixin doonta lacagta lagu dirayo. Ka wac DCS lambarkan 800-442-KIDS (5437) kadibna codso in foomka boostada laguugu soo diro.

## Miyaan heli karaa Nuqulka foomkayga Qirashada Waalidnimada?

Haa. Waaxda Caafimaadka (DOH) ayaa fulinaysa oona haynaysa diiwaanka rasmiga ah ee foomamka waalidnimada la diray. Waxaad ka daabacan kartaa foomka amarka ah boggaan internetka ah www.doh.wa.gov si aad u dalbatid warqada xaqiijinta waalidnimada ama nuqul ku saabsan foomka waalidnimada la diri karo. Ka wac DOH/CHS lambarkan 360-236-4300 haddii aad qabtid wax su'aalo ah. Waxaa lagu dabakhayaa lacagta hawl socod siinta ee DOH.

## Maxay yihiin xuquuqahayga sharciga ah marka aan sixiixo foomka Qirashada Waalidnimada?

Marka aad sixiixdid foomka, sharciga federaalka wuxuu dhigayaa in ay khasab kugu ah in aad heshid dhammaan macluumaad afka ah iyo mid qoran oo ku saabsan xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga. Xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga waxay ku qoranyihiin bogga 2 ee foomka hoosta BAYAANADA QIRASHADA. Waa muhiim in aad fahantid waxa uu sharcigu dhigayo. Akhri bayaanada kadibna samee mid kamid ah kuwaan soo socda:

- Ku daawo muuqaal isbitaalka, xarunta lagu dhalayo, waaxdaada caafimaadka deegaanka, ama xafiis kasta oo DCS ah.
- Dhagayso khadka macluumaadka Qirashada Waalidnimada adiga oo waca 800-356-0463.
- Qof weydii in uu kuu akhriyo bayaanada.
- **Ha sixiixin foomka illaa aad ka heshid kana fahantid dhammaan macluumaadka afka ah iyo kuwa qoran.**

## Miyaan sixiixi karaa Qirashada Waalidnimada xitaa haddii aan ahay qof ay da'diisu ka yartahay 18 sanno?

Haa. Qirashada Waalidnimada uu sixiixo qof yar waa mid sharci ah. Sharciga gobolka wuxuu saarayaa dadka yar-yarka ah (dadka ay da'doodu ka yartahay 18 sanno) kuwaas oo sixiixaya foomka isla darajada mas'uuliyada uu siinayo dadka waaweyn.

## Maxaan sameeyaa haddii aanan hubin in aan doonayo in aan sixiixo foomka Qirashada Waalidnimada?

Sixiix foomka kaliya haddii aad si buuxda u ogtahay in aad doonaysid in aad si sharci ah u samaysid noqoshada waalidka ilmaha. Waxaa dhici karta in aad u baahatid in aad la hadashid qareen ama abuukaate. Haddii aad go'aan ku gaartid in aadan sixiixin Qirashada, waxaa jira qaabab kale oo lagu samaynayo waalidnimada. Waxaad weydiin kartaa maxkamada in ay samayso waalidnimada. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan samaynta waalidnimada, waxaad wici kartaa DCS. DCS kuma siin karto tallo sharciyeed.

DCS waxay leedahay barnaamij baaritaan waalidnimo lacag la'aan ah. Inbaddan oo dadka kamid ah waxaa looga soo wareejiyaa barnaamijkan dhinaca isbitaalka halkaas oo uu ilmaha ku dhashay. Haddii aad doonaysid in aad oggaatid haddii aad u qalantid, fadlan kala xiriir Barnaamijka Baaritaanka Waalidnimada Iskaada ah ee DCS (VPTP) lambarkan 1-800-285-1892.

## Miyaan bedeli karaa ra'yigayga kadib marka aan sixiixo foomka?

Waalidka sixiixay Qirashada Waalidnimada ama qofka sixiixay Diidista Waalidnimada ayaa bedeli kara ra'yigooda kadib marka ay sixiixaan. Ereyga sharciga ah ee loogu talogalay in magacaaga laga saaro ama tiro diiwaanka dhallashada wuxuu yahay “burin.” Waxaa khasab kugu ah in aad buuxisid foomka Burinta Waalidnimada kadibna ugu dirtid dhinaca Waaxda Caafimaadka, Xarunta Tirakoobka Caafimaadka si loo buriyo Qirashada ama Diidista gudaha muddo ugu badnaan ah 60 maalmood kadib taariikhda DOH/CHS ay dirto foomka ama kahor dhagaysiga maxkamada ee koowaad, midkasta oo soo hormara. Waxaad u baahnaan doontaa in aad bixisid lacagta lagu dirayo foomka Burinta Waalidnimada loo dirayo DOH/CHS.

## Miyaan ku khasbanahay in Aan qabsado qareen ama abuukaate si aan u buriyo Qirashada Waalidnimada?

Waxaad u samayn kartaa dirista foomka Burinta Waalidnimada adiga nafsadaada, ama caawimaad uu kugu caawiyo qareen ama abuukaate. Marka la diro foomka Burinta Waalidnimada, DOH/CHS waxay ka saari doontaa ama ka tiri doontaa magaca waalidka labbaad shahaadada dhallashada.

## Maxaan sameeyaa haddii aan ra'yigayga bedelo oona la gudbo 61 maalmood ama wax ka baddan kadib taariikhda DOH/CHS ay dirto qirashada?

Waalidka ayaa uga hor imaan kara Qirashada Waalidnimada maxkamada. Diidista Qirashada sidoo kale waxaa looga hor imaan karaa maxkamada. Haddii aad dirtid tallaabo looga hor imaanayo Qirashada ama Diidista, waxaa jira sababo xadidan oo ay maxkamadu ku dhagaysan doonto kiiskaaga ama dacwadaada. Waxaa dhici karta in aad xaqiijisid in aad u sixiixday Qirashada ama Diidista khiyaano, khasbid, ama khalad waxyaabo darteeda. Adiga waxaad haysataa oo kaliya 4 sanno si aad u biloowdid tallaabada looga hor imaanayo Qirashada Waalidnimada ama Diidista Waalidnimada ee maxkamada laga bilaabo taariikhda foomka loo diray dhinaca DOH/CHS.

### Maxaa dhacaya haddii waalidka ilmaha dhallay uu guursaday qof kale ama uu ku jiro xiriir lammaananimo guri diiwaan-gashan?

Haddii waalidka ilmaha dhallay uu guursaday ama uu ku jiro xiriir lammaananimo guri diiwaan-gashan inta lagu guda jiro uurka, xaaska/ninka ama lammaanaha guriga waxaa la filanayaa (la aaminsanyahay) in uu yahay waalidka kale haddii uu ilmaha dhasho:

- inta lagu guda jiro guurka ama lammaananimada guriga ee diiwaan-gashan.
- gudaha 300 oo maalmood kadib dhammaadka guurka ama lammaananimada guriga diiwaan-gashan.

Haddii xaaska/ninka waalidka ilmaha dhallay ama lammaanaha guriga uu oggolaado in uu qof kale u sixiixo in uu yahay waalidka labbaad, qofkaasi wuxuu sixiixi karaa Qirashada Waalidnimada. Xaaska/ninka waalidka ilmaha dhallay ama lammaanaha guriga waxaa khasab ku ah in uu sixiixo Diidista Waalidnimada ama Qirashada Waalidnimada in aysan ahayn mid sharci ah.

## In Waalidnimada lagu Sameeyo Maxkamada

### Goormee ayay khasab tahay in ay maxkamadu samayso waalidnimada?

Waxaa khasab kugu ah in aad aadid maxkamada marka aad aaminsantahay in uu jiro wax ka baddan hal aabe oo suurtogal ah ama waalidiin kale oo suurtogal ah.

**Sababo kale oo loo isticmaalayo maxkamadaha in ay sameeyaan waalidnimada:**

- Haddii midna waalidka uusan hubin waxyaabaha ku saabsan sixiixida qirashada.
- Haddii xaaska/ninka waalidka ilmaha dhallay ama lammaanaha guriga uusan doonaynin in uu sixiixo diidista.



## Sideen ugu furayaa kiiska ama dacwada waalidnimada maxkamada?

Gobolka wuxuu samayn karaa waalidnimada loogu talogalay ilmahaaga haddii aad codsatid in aad ka furtid kiiska ama dacwada samaynta waalidnimada dhinaca DCS. Ka wac DCS lambarkan 800-442-KIDS (5437) ama xafiiska DCS ee kuugu dhow si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Haddii DCS ay aqbasho kiiskaaga ama dacwadaada, waxaynu u wareejin doonaa kiiskaaga ama dacwadaada qareenka dembi oogista gobolka. Xeer ilaaliyaha wuxuu matalayaa ilmahaaga mana noqonayo mid adiga kugu matali kara maxkamada ama ku siiya tallo sharciyeed. Xeer ilaaliyaha wuxuu kaaga jawaabi karaa su'aalaha guud ee ku saabsan kiiskaaga ama dacwadaada waalidnimada. Waxaa khasab kugu ah in aad noo sheegtid haddii uu ilmaha qaadanayo caawimaada dadweynaha ama caawimaada caafimaadka.

DCS sidoo kale waxay leedahay gelida qaar kamid ah maxkamadaha qabiileed si loogu sameeyo waalidnimada kiisas ama dacwado qabiileed gaar ah.

Waxaa khasab kugu ah in aad weydiisid qareenka ama abuukaataha jawaabaha ku saabsan su'aalaha sharciyeed iyo wakiilka maxkamada. Haddii aadan doonaynin adeegaha DCS, adiga ama qareenka ama abuukaataha waxaad u diri kartaan tallaabada waalidnimada maxkamada si loogu sameeyo xukunka kiiskaaga ama dacwadaada.

## Sideen ugu samayn karaa waalidnimada maxkamada?

Haddii uu gobolku isku dayayo in uu sameeyo waalidnimada, xeer ilaaliyaha gobolka ayaa inta baddan siin doona waraaqaha sharciyeed aabayaasha suurtogalka ah ama waalidiinta kale ee suurtogalka ah. Xeer ilaaliyaha ama maxkamada waxay u baahnaan karaan in hooyada, aabayaasha suurtogalka ah, iyo ilmaha lagu sameeyo baaritaanka lagu oggaado hida ilmaha qofka dhallay. Maxkamadu waxay amri kartaa amar lagu samaynayo waalidnimada.

## Maxaa laga wadaa baaritaanka lagu oggaado hidaha wadaha miyaana u baahanahay in aan sameeyo baaritaanka?

Hida wadaha waa qayb kamid ah unugyada jirkeena. Waxay sidaan sifooyinka looga gudbiyo ilmaha dhinaca waalidiinta. Baaritaanada hida wadaha waxay isku bar-bardhigaan hida wadayaasha. Haddii hido wadayaal gaar ah ay isku mid noqdaan, waalidka iyo ilmaha in uu xiriir ka dhaxeeyo. Baaritaanada hida wadaha ee loogu talogalay waalidnimada waa kuwo aad sax u ah.

Baaritaanada hida wadaha ee loogu talogalay waalidnimada wuxuu isku bar-bardhigaa qaybo kala duwan oo unuga aabaha, hooyada, iyo ilmaha ah kuwaas oo laga soo aruuriyo suufaf la geliyo gudaha afkooda. Shaybaarka baaritaanka hida wadaha wuxuu soo saarayaa warbixin sharxaysa haddii uu ninku yahay aabaha ilmaha dhallay. Maxkamadu inta baddan waxay u baahnaanaysaa baaritaanka hida wadaha haddii uu jiro wax ka baddan hal aabe |oo suurtogal ah.

### Ma jiraan wax qiimooyin kharashaad ah oo la bixinayo marka lagu samaynayo waalidnimada maxkamada?

- Haddii xeer ilaaliyaha gobolka uu ku sameeyo waalidnimada gudaha maxkamada ee ah kiiska ama dacwada DCS, adigu ma bixinaysid lacagta fayl dirida. Waxaa dhici kara in ay jiraan qiimooyin kharashaad xiriir la leh ku samaynta waalidnimada gudaha maxkamad.
- Haddii aad qabsatid qareen ama abuukaate, adiga ayaa mas'uul ka ah lacagaha iyo qiimooyinka maxkamada.
- Maxkamada waxaa dhici karta in ay ku amarto waalidiinta in ay bixiyaan qiimooyinka kharashaadka lagu bixiyo baaritaanka hida wadaha ama qiimooyin kale oo maxkamadeed.

## Waxyaabo Baddan oo aad u Baahantahay in aad Oggaatid

### Sideen u sameeyaa xuquuqaha waalidnimada sida xanaanada iyo booqashada?

Kaliya maxkamadaha ayaa sheegi kara xanaanada sharciga ah iyo arimaha ku saabsan booqashada. Midaan waxaa lagu sameeyaa Jadwalka Deegaanka/Qorshaha Waalidnimada. Haddii adiga ama waalidka kale go'aansan karin arimaha booqashada xanaanada, la xiriir qareen ama abuukaate, dhex-dhexaadiye ama fududeeye maxkamad.

- Si aad ula hadashid dhex-dhexaadiyaha, kasoo wac Xarumaha Xalinta Muranka ee Galbeedka Washington lambarkan 800-280-4770.
- Si aad u heshid fududeeyaha maxkamada, la xiriir Shaqaalaha xafiiska Maxkamada Sare ee deegaankaaga.

Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah wac DCS kadibna codso buuggyaraha cinwaankiisu yahay, “Maxaan sameeyaa si aan u arko ilmahayga ama ayaga ii arkaan inbaddan? Taakulada Ilmaha, Booqashada iyo Xanaanada.”

### Miyaan samayn karaa waalidnimada haddii mid waalidiinta kamid ahi uu ku noolyahay gobol kale?

Haa. Waalidka ku nool gobol kale wuxuu sixiixi karaa Qirashada Waalidnimada. Gobolada kale ee la shaqeeya DCS si ay u helaan amarka waalidnimada loogu talogalay carruurta ku dhashay gudaha ama dibada Gobolka Washington.

## Sidee iigu caawin kartaan samaynta waalidnimada ama ka jawaabida su'aalahayga?

- Wac 800-442-KIDS (5437) ama fiiri gadaasha buuggyarahaan si aad u heshid lambarka teleefoonka ee xafiiska DCS ee adiga kuugu dhow.
- La hadal qareen ama abuukaate.
- Wac CLEAR (Waxbarashada Sharciyeed ee La isku duway, nidaamka Tallada iyo Wareejinta) lambarkan 888-201-1014.
- Haddii aad ku nooshahay Gobolka King, ka wac Guddiga Ururka ee Gobolka King lambarkan 206-623-2551 si aad u weydiisid waxyaabaha ku saabsan caawimaada sharciyeed ee lacagta-jaban.

## Xafiisyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS)

| | |
|---|---|
| Everett | 800-729-7580<br>425-438-4800 |
| Kennewick | 800-345-9981<br>509-374-2000 |
| Olympia | 800-345-9964<br>360-664-6900 |
| Seattle | 800-526-8658<br>206-341-7000 |
| Spokane | 800-345-9982<br>509-363-5000 |
| Tacoma | 800-345-9976<br>253-597-3700 |
| Vancouver | 800-345-9984<br>360-696-6100 |
| Wenatchee | 800-535-1113<br>509-886-6800 |
| Yakima | 800-441-0859<br>509-249-6000 |
| Xarumaha dhexe | 800-457-6202<br>360-664-5000 |
| Ii-mayl | dcs-cru@dshs.wa.gov |

Washington State
Department of Social
& Health Services

*Transforming lives*